



u tag isaga waxaadna ku tiraahdaa ka mid maahid ahlu naarka, ee waxaad ka mid tahay ahlu Janada

Anas Binu Maalik Allaha ka raali noqde waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabiga scw wuxuu waayey Thaabit Binu Qays, nin ayaa yiri: Rasuul Ilaayahow, anaa warkiisa ku soo ogaysiin, wuu u tagay isagoo gurigiisa fadhiya, oo hoos eegaya, wuxuu ku yiri: maxaa ku helay?, wuxuu yiri: waa shar, codkiisa ayuu codka Nabiga scw ka dulmarin jiray oo camalkiisii waa buray, wuxuun ka mid yahay ahlu naarka, ninkii Nabiguu scw u yimid oo u sheegay inuu caynkaa iyo caynkaa yiri, mar labaad ayuu ku soo noqday isagoo bishaaro wayn u wada, wuxuuna ku yiri: " u tag isaga waxaadna ku tiraahdaa ka mid maahid ahlu naarka, ee waxaad ka mid tahay ahlu Janada.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu waayey Thaabit Binu Qays-Allaha ka raali noqde-, markaasuu waydiiyey, nin baa yiri: anaa kuu soo helaaya warkiisa iyo sababta uu la maqan yahay wuu aaday, wuxuu helay isagoo murugaysan, oo hoos egaaya, oo gurigiisa jooga , wuu waydiiyey: maxaa ku helay? Thaabit wuxuu u sheegay: inuu shar ku sugan yahay, waayo wuxuu hadalkiisa kor uga dhigi jiray hadalka Nabiga scw, Ilaahayna qofka sidaa sameeya wuxuu ugu yaboohay in camalkiisu buraayo oo uu naarta gelaayo. Ninkii Nabiga scw ayuu ku soo noqday wuuna u sheegay warkii, Nibagaa amray ninkii inuu ku laabto Thaabit, uguna bishaareeyo inaanu ahayn kuwa naar galaya, oo uu yahay kuwa janada galaya, waayo codkiisu abuur ahaan buu u dheeraa, wuxuuna ahaa khadiibka (gud biyaha warka si dadku u wada maqlaan hadalka) Rasuulka -naxariis iyo nabadi korkiye-iyo khadiibka reer Ansaar.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65073>

